

Shuruucda Waxgubka Banaanka (Outdoor Burning Regulations)



Gacaliyaha Daggan,

Cabashooyinka wax ku gubka banaanku waa wax ka mid ah shaqo maalmeedka Dabdamiska iyo Badbaadada Portland (Portland Fire & Rescue). Waxaanu ka jawaabnaa yeedhmooyin fara badan oo ay ka mid yihiin caafimaad, dab, badbaadin, shil gaadiid, iyo baadhista qalab ka sunta leh iyo waxyaabo kale oo badan. Maadaama sida badan la noo yeedho waxaan u baahanahay inaan dadka barno sharciyada gubista si aanu u dhino yeedhmooyinka faraha badan ee aan muhiimka ahayn, uguna caawino isticmaalka dabka sharciga ah ee lagu sameeyo bannaanada.

Shuruucda **u gaarka ah gubniinka lagu isticmaalo aqalka banaankiisa ee agagaarka magaalada Portland duleedkeeda**, waxaad ka codsan kartaa warbixin Wakaalada Qiimaha Deegaanka (DEQ: Department of Environmental Quality). Waqti cayiman oo ah sanadka gudihiiisa, waa sharci inaad gubto wixii qashin ah ee barandahaaga yaal, wixii ka baxsan magaalada Portland waa hadii aad raacayso tusaalooyinka sharciyada gubsita badbaadada. **Magaalada Portland gudaheega** gubista caynkaasi oo kale waa mamnuuc, laakiinse waxaa jira dhowr banana gubis **kuwaasi** oo shariya, kuwaasi waxaa ka mid ah.

1. **Qalabka wax lagu dubo** marka loo isticmaalo si badbaado leh oo heer fiican gaadhsiisan.
2. **Dab xafladeed.** Isku imaatinka wayn ama macaahida marka ogolaansho laga helo Xafiiska Ciidanka Dabdamiska (Fire Marshal's Office) waxaa laga rabaa inaad awood siin qoraal ah aad ka haysato Hantiilaha. Ogolaanshahaasi waa in la saxeeaa lana taariikheeyaa marka la dalbanaayo ogolaanshaha. (Ogolaanshaha waxaa laga qaadan kara xafiiska ka hortaga dabka (Fire Prevention Office) ee ku yaala 1300 SE Gideon Street, Portland OR 97202 – 503-823-3712.)
3. **Dab loo shido madadaalo.** Waa la ogolyahay dabkaasi oo kale hadii uu yahay nadiif, qalayl sida nooca dabka loo shito in la dugsado ookale. Dabkani oo kale waa in loo dhiso hog dabeed ama wax loogu talogaley ula jeedadani oo kale. Dabku waa inuuna ka waynaanin meesha dabka la dugsado lagu shito oo kale, ka yar 3 talaabo balac ahaan oo ololkiiisuna uuna ka dheerayn 2 talaabo.
 - Dabka loo shido madadaaladu ee ku jira hog ama dayr waa in aan looga soo dhawaanin fogaan dhan 15 talaabo. Dababka ku jira meesha dabka lagu shito oo kale waa in aan looga soo dhawaan fogaan dhan 10 talaabo. **E** ka ku jira bahalo laga sameeyo camuud oo dabka lagu shito oo kale ama qasabada guriga qiiqa ka saarta, “Chimneys” waa in aan looga soo dhawaan fogaan dhan 5 talaabo. Marka laga codsado Ciidanka Dabdamiska (Fire Marshal), gubista ka dhacda banaanka iyo rasada wax lagu gubaayi waa inay ku qalabaysanyahay xadhigyada wax lagu duubo oo kale oo inta u furana aysan ka yarayn 3/8” ama ka badan 1/2”.
 - Qof masuul ah waa inuu joogaa meesha mar walba, gacantana ku haystaa (shey biyo ka buuxaan oo ah caaga wayn ee beerta lagu waraabiyo oo tuunbo af leh) qalabka la ogolyahay ee dabka lagu damiyo.
 - Qiiqa ka soo baxa dabkaasi waa inuuna lahayn ur aad u qadhmun taasi oo abuur karta inuu jaarku ka soo cawdo.
 - Wax qashin ah ama la mid ah waa inaan lagu gubin dabkaasi.
 - Ilaali badbaadada caadiga ah markaad ku raaxaysanayso dabka loo shido madadaalada. (Jooji gubista hadii ay dabaysho gaadho 15 mayl saacadii ama ka dhakhso badan, ka digtoonow isticmaalida khamriga wixii dad kula jooga agagaarka dabka, ilaali wixii caruur ah ee nawaaxiga jooga. Iyo wixii la mid ah.)

Ururka Dab Damisku (Fire Bureau) u soo jawaabi mayo dabka madadaalada oo kale ah sidaan dusha ku soo sheegnay laakiinse shaqaalahayagu way bakhtiin karaan hadii wax dab ahi ka dhasho midka banaanaka lagu shido hadii lagu xadgudbo qawaaniinta ama shuruucda.

Warqadani waxay ku siineysaa rajo ah in aan kaa caawin doono inaad ku raaxaysato dab badbaado leh kuna madadaaltid, isla markaana anaga oo hubineyna in qeyahayaga kale ay si deg-dega uga jawaabayaan xaaldaha khatarta ah ee ka dhacaaya jaarkaaga.

Aad baad ugu mahadsantahay wada shaqayntaada. Hadii wax su'aalo ah oo intaa ka faahfaahsan aad qabto, waad soo wici kartaa Xafiiska Ciidanka Dabdamiska (Fire Marshal's Office) ee Dabdamiska iyo Dadbaadinta Portland 503-823-3700.